Xeerka Bukaanka Isbitaalka Dadweynaha

Waxaad xaq u leedahay inaad filato kana hesho adeegya leh taya sarre Isbitaalka Dadweynaha.

patientcharter.health.vic.gov.au

Victoria
The Place To Be

Somali

Xeerka Bukaanka Isbitaalka Dadweynaha

Waxaad xaq u leedahay inaad filato kana hesho adeegya leh taya sarre Isbitaalka Dadweynaha.

Xeerkaani wuxuu kor u qaadayaa wada shaqaynta u dhexaysa shaqaalaha adeega caafimaadka iyo adiga. La shaqaynta kooxdaada aqoonyahaniinta caafimaadka ku daaweynaysa waxay keeni kartaa natiijooyinka ugu fiican xagga caafimaadkaaga. Kooxda ku daaweynaysa waxaa ku jira dhakhaatiir, kalkaaliyayaasha caafimaadka iyo shaqaalaha kale ee caafimaadka kuwaas oo ku daryeellaya intaad isbitaalka ku jirto. Isbitaalku wuxuu kaloo yeellan doonaa Wakiilka Bukaanka kaas oo laga yaabo in aad jeclaan lahayd inaad la xiriirto haddii aad qabto dareen, dhibaato ama waxweydiin ku saabsan arrimaha soo socda intaad joogto isbitaalka.

Qoraalkani wuxuu ku siinayaa macluumaad ku saabsan waxaad ka filanayso isbitaalada dadweynaha waxaana lala akhriyi karaa macluumaadka kale ee isbitaalka iyo kan ka hadlaya xuquuqda bukaanka.

Kuwan soo socdaa waa xuquuqdaada iyo masuuliyaadkaaga isbitaalka dadweynaha.

Xuquuqdaada

Xaq waxaad u leedahay:

Adeegya isbitaal dadweyne oo aad u ballaaran.

Isbitaalada dadweynaha ee Fiktooriya waxay siiyaan adeegya aad u ballaaran dadka degan Australia waxaana lagu siin doonaa adeegyada ugu wanaagsan. Mararka qaarkood taasi waxay noqon kartaa in loo xawilo isbitaalla kale ama daryeel caafimaad, sida baxnaaninta ama xarunta daryeelka caafimaadka bulshada. Yeelashada adeegya ballaaran macneheedu waxa weeye meel kasta oo aad ka joogto Gobolka, waxaad helli doontaa daryeel haboon oo leh taya sarre.

Daaweyn ku salaysan baahida caafimaad iyadoo aan ku xirnayn awooda bixinta xaalladaada caymiska caafimaadka.

Waxaad xaq u leedahay in lagu daaweeyo, marka xaalladaada caafimaad u baahan tahay, iyadoo aan ku xirnayn inta lacag aad haysato ama haddii aad leedahay caymis caafimaad oo gaara.

Dooro haddii aad doonayso in laguu daaweyo bukaan guud ama mid gaara.

Marka Isbitaalka lagu dhigo, ka hor ama waxyarba ka dib, waxaad goáansan kartaa in laguu jiifiyo bukaan gaara ama mid guud. Haddii aad tahay bukaan guud, lagugu soo dalicimayo adeegyada daaweynta ama isbitaalka. Haddii aad tahay bukaan gaara, adiga caymiyahaaga waxaa lagu soo dalici doonaa adeegyada qaarkood. Si kasta ha ahaatee, waxaa laga yaabaa inaad rabto inaad kala hadasho isbitaalka, kharajka caafimaadka ama dhakhtarka waxa ay yihiin adeegyada kale ee laga yaabo in lagugu soo dalaco bukaan guud ahaan ama mid gaara ahaan. Xaqa aad u leedahay inaad doorato dhakhtarka ku daaweynaya waa kala duwanaan doonaa haddii aad tahay bukaan guud ama mid gaara.

Ku daaweynta iyo ku daryeelida degaan amaana.

Waxaad xaq u leedahay inaad dareento amaan, nadaafad iyo raaxo inta aad isbitaalka joogto. Waxaad xaq u leedahay inaad soo jeediso dareen kasta oo aad ka qabto shaqaalaha, aadna ka codsato caawimad Wakiilka Bukaanka ee isbitaalka.

Ka qaybgelida goáan ka samaynta daryeelkaaga iyo daaweyntaada.

Waa inaad si buuxda lug ugu yeellataa goánanada daryeelidaada laguna siiyaa fursada ah inaad weydiiso suáallo kalana hadasho daaweynta si aad u fahamto waxa socda. Haddii aad qaangaar tahay waxaad xaq u leedahay inaad diido daaweynta haddii aad rabto. Waxaa kale oo aad magacaaban kartaa qof goánanada kuu sameeya haddii ay dhacdo inaad gaarto in aan tala lagu weydiin karin. Wixii intaas ka badan fadlan la xiriir Xafiiska Qareenka Dadweynaha.

Ka qaybgal goáanada helna macluumaadka ku saabsan ka bixidaada isbitaalka.

Waa inaad si buuxda lug ugu yeellataa goán ka gaarida sida iyo marka aad ka baxayso isbitaalka. Inta aan lagu saarin, waa in goán laga gaaraa wixii ku saabsan baahidaada taagan. Waxaad xaq u leedahay ka qaybgelida goáanadaan iyo inaad hesho macluumaadka ku saabsan adeegyada la helli karo. U xawilidaada dhakhtar guud ayaa iyana ku jiri doonta hawshaan. Waxaa laga yaabaa inaad ka baxdo isbitaalka adoo diidan talada dhakhtarka, si kasta ha ahaatee, waxaa laga yaabaa in lagu weydiiyo inaad saxiixdo foom aad ku aqbalayso masuuliyada goáankaaga.

Macluumaad ku saabsan shaqaalaha isbitaalka ee bixin doona daryeelkaaga.

Isbitaalka waxaa kugu arki doona tira badan oo dad ah. Waxaad xaq u leedahay in laguu sheego cida masuulka ka noqonaysa daryeelkaaga iyo sida loola xiriirayo.

Macluumaad ku saabsan daryeelka caafimadaadkaaga, iyo haddii aad rabto, aragti daaweyn oo labaad.

Waxaad xaq u leedahay in si buuxda laguugu sheego wixii ku saabsan daaweyntaada. Waa in lagu siiyaa waqti kuugu filan inaad suáal ku weydiiso, hel macluumaad badan lana hadal qoyska iyo saaxiibada inta aadan samayn wax suáalla ah. Haddii aadan hubin wixii ku saabsan daaweyntaada waxaad xaq u leedahay inaad ka hesho dakhtar kale aragti labaad.

Hellitaanka diiwaanka caafimaadkaaga iyo sirta macluumaadkaaga shakhsiyeed.

Inta aad joogto isbitaalka ama marka lagaa saaro ka dib, ama daaweyn kasta ka dib, waxaa laga yaabaa inaad rabto inaad aragto diiwaanka caafimaadka. Waa suurta geli kartaa inaad qabanqaabiso in aad si aan rasmi ahayn aad uga hesho dhakhtarkaaga ama Sarkaalka Arrimaha Gaarka ah ee Isbitaalka, qaar ama dhamaan diiwaankaagaa. Waxaad kaloo ka dalban kartaa Hayáda Macluumaadka Xorta ah (Freedom Of Information) si aad u aragto una hesho koobiga diiwaankaaga. Sarkaalka Arrimaha Gaarka ah ama Sarkaalka hayáda Macluumaadka Xorta ah ee isbitaalka ayaa kugula talin kara samaynta codsiga foomka laga soo hadlay. Kani waa hab aad rasmi u ah waxaana laga yaabaa inaad u baahato inaad la xiriirto Wakiilka Bukaanka wixii caawima ah.

Qof kasta oo qayb ka qaadanaya daaweyntaada iyo daryeelkaaga waxaa saaran masuuliyad sahaqo iyo sharci inay xafidaan macluumaadkaaga. Macluumaadka adiga kugu saabsan waxaa loo gudbin karaa keliya qof kale, oo aan ku shaqa lahayn daryeelkaaga, haddii adiga ama sharcigu ogolaado. Qof kasta oo ka hella isbitaalka macluumaad adiga kugu saabsan ayaa si sharci ahaana loogu leeyahay inuu u ilaaliyo si qarsoodi ah.

U daaweynta si mudan ixtiraam, sharaf iyo qadarinta arrimaha gaarka ah.

Iyadoo dadaalka ugu sarreeya la samaynayo, Adeegyada caafimaadka ayaa ku bixin doona daryeelid iyo daaweyn meel ogolaanaysa ixtiraamida arrimaha gaarka ah. Waa in laguu daaweeyaa hab ixtiraama qofnimadaada. Waxaa lagaa filayaa inaad ula dhaqanto shaqaalaha isbitaalka si ixtiraam iyo qadarin mudan.

Haddii ay muhiim tahay, waxaad helli kartaa mutarjum la aqoonsan yahay.

Waxaad xaq u leedahay inaad u isticmaasho adeega afcelinta macluumaadka muhiimka ah sida jiifinta, iyo ka wada hadalka taariikhdaada caafimaad iyo daaweyntaada. Haddii aad u baahan tahay mutarjum inta aad joogto isbitaalka, fadlan u sheeg dhakhtarkaaga ama kalkaaliyaha caafimaadka sida ugu dhaqsaha badan. Mutarjumka ayaa la keeni karaa ama telefoon lagula xiriiri karaa.

Adeegyada loo bixiyo si dhaqanka waafaqsan.

Waxaad xaq u leedahay in laguu daaweeyo hab ixtiraamaya dhaqankaaga iyo waxaad aaminsan tahay; masalan, tani waxay la xiriiri kartaa qof ku daawaynayaa wuxuu noqonayo rag ama dumar ama cuntada aad u baahan tahay. Markay suurta gal tahay, isbitaalku wuxuu isku deyi doonaa inuu sameeyo wixii karaakiisa ah si uu baahidaada wax uga qabto. Haddii aad qabto wax welwel ah, waa inaad la hadashaa qof ka mid ah shaqaalaha ama Wakiilka Bukaanka.

Macluumaadka talaabooyinka isbitaalku qaadayo si uu u wanaajiyo tayada daryeelka.

Isbitaaladu waxay badanaa isku deyayaan wanaajinta tayadooda daryeel. Mararka qaarkood bukaamada ama xubnaha qoyska ayaa arki kara dariiqooyin lagu wanaajin karo adeegyada. Haddii aad hayso fikrado

ku saabsan sida adeegyada loo wanaajin karo fadlan u sheeg shaqaalaha.

Adeegyada badankood waxay u baahan yihiin in dadka aay daaweynayaan hellaan heerarka la aqoonsan yahay. Isbitaaladuna kama duwana. Laga soo bilaabo 2001, isbitaalada waxaa looga baahnaa inay soo qadimaan warbixinta daryeelka ee tayada sanadeed taas oo faahfaahinaysa sida isbitaalku u wanaajinayo tayada daryeelkiisa. Xaq ayaad u leedahay macluumaadkaan.

Fursad aad kaga hadasho suáal kasta ama cabasha kasta ee laga yaabo inaad qabto intaad joogtey isbitaalka.

Haddii aad qabto suáal ama cabasho, fadlan la hadal kooxdaada. Shaqaalaha isbitaalka ayaa doonaya inay xaliyaan dhibaatooyinka si dhakhsa ah, laakiin waxay u baahan yihiin in dhibta loo sheego marka hore. Isbitaalada guud ee Fiktooriya dhamaantood waxay leeyihiin Wakiilada Bukaanka. Haddii dhibaatooyinkaaga aanay xaliyi karin kooxda ku daaweynaysaa, waa inaad la hadashaa Wakiilka Bukaanka.

Cabashadaada u gudbi ururka cabashooyinka madaxabanaan.

It is always best to try to resolve your complaint with the hospital. If you have tried this and are still unsatisfied, you can make a complaint to the Health Services Commissioner. The Commissioner can help make concerns known to hospital staff and provide advice and ways to assist in the resolution of your complaint.

Waxaa mar walba fiican inaad isku daydo inaad cabashadaada la dhamayso isbitaalka. Haddii aad tan isku dayday welina aadan ku qanacsanayn, waxaad u qadimi kartaa cabasho Xubinta-Guddiga Adeegyada Caafimaadka. Xubinta Guddiga ayaa caawimi kara in waxaad qabto loo sheego shaqaalaha isbitaalka lana siiyo talo iyo dariiqooyin lagu caawimi karo in xal laga gaaro cabashadaada.

Masuuliyadahaaga

Waxaad masuul ka tahay inaad:

La shaqay kooxda ku daaweynaysa adigoo siinaya macluumaadka la xiriira caafimaadkaaga iyo duruufaha laga yaabo inay saamayn karaan daaweyntaada, soo ladnaanshahaaga ama joogidaada isbitaalka.

Waxyaalla badan ayaa waxyeelli kara caafimaadkaaga, sida taariikhdaada caafimaadka, caafimaadka guud, xaalladaha bulsho iyo nabdoonida shucuurta. Kooxdaada daaweyntu waxay ku siin karaan keliya daryeelka ugu fiicaan haddii ay og yihiin dhamaan macluumaadka la xiriira wixii ku saabsan caafimaadkaaga iyo duruuftaada. Masuuliyad ayaa kaa saran inaad siiso kooxda ku daaweynaysa dhamaan macluumaadka xiriirka leh markii wax lagaa weydiiyo caafimaadkaaga. Si loo hello natiijada ugu fiicaan caafimaadkaaga, adiga iyo kooxda ku daaweynaysaa waxaad u baahan tihiin inaad u wadaagtaan macluumaadka si furan.

Macluumaad intaas ka badan

Macluumaad intaas ka badan oo ku saabsan Xeerka Bukaanka Isbitaalka Dadweynaha waxaa laga helli karaa: patientcharter.health.vic.gov.au

Isbitaalkaagu wuxuu leeyahay Wakiilka Bukaanka. Weydii shaqaalaha isbitaalka ama miiska soo dhoweynta.

Macluuaadka ku saabsan xuquuqda bukaanka caafimaadka maanka, bukaanada isbitaalada gaarka ah, caymiska caafimaadka iyo sharciga la xiriira xuquuqda bukaanka waxaa laga helli karaa website-ka iyo meelaha lala xiriirayo oo hoos ku yaal.

Isbitaalada qaarkood ayaa leh Shaqaalaha la shaqeeya dadka Aboriginiska ah. Weydii shaqaalaha isbitaalka ama miiska soo dhoweynta.

Macluumaadka ku saabsan Xuquuqda Bukaanka Caafimaadka Maanka waa laga helli karaa iyadoo qoran ama iyadoo la booqanayo shabakada Internet-ka: www.dhs.vic.gov.au/ahs/mental.htm

Xubinta-Guddiga Adeegyada Caafimaadka

30th Floor, 570 Bourke Street,
Melbourne 3000
Telefoon: 8601 5200
Telefoon lacag laáana 1800 136 066
Fakis 8601 5219
Website:ka www.health.vic.gov.au/hsc

Xafiiska Qareenka Dadweynaha

Level 5, 436 Lonsdale Street
Melbourne 3000
Telefoon 9603 9500
Telefoon lacag laáana 1800 136 829
Website:ka www.publicadvocate.vic.gov.au

Wixii intaas ka badan oo ku saabsan Mabaadiida Arrimaha gaarka iyo Xeerka Diiwaanka Caafimaadka ee 2001 iyo xuquuqdaada waxaa laga helli karaa shabakada Internet-ka: www.dhs.vic.gov.au/privacy

Xeerka Isbitaalka Bukaanka Gaarka ah waxaa laga helli karaa Internet-ka:
www.health.gov.au/privatehealth/providers/charter/pphc.pdf

State Government Victoria
Department of Human Services
Somali
(0050302)